

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO



Dumarka oo dhan.
Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.
Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law
Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et
droit de la famille
Le droit de savoir

Gar-qaadida Xeerka Qoyska

Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagugu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseeyso sharciga xeerka qoyska, raadso la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaataada xeerka qoyska" oo ku qoran shabakadda www.onefamilylaw.ca.

Haddii adiga iyo saygaada aad kala tagtaan, waxaa ku soo food saari doono arrimo badan oo qaanuuni ah. Waxaa ka mid ah, isku afgarashada kharashka reerka, isku afgarashada danaha caruurta iyo isku afgarashada sida aad u kala qeybsan lahaydeen hantida reerka. Maxkamadda ayaad tagi kartaa si go'aan looga gaaro arrimahan. Labadiina ayaa xal isla gaari kara ama waxaad adegsan kartaa **Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka** (ADR).

Si aad u xalliso khilaafka ha isticmaalin habka ADR haddii uu qofka kale yahay ruux rabshoole ah ama ku xadgudub badan. Ha u isticmaalin habkan ruux horey isugu dayey in uu kugu amar taagleeyo ama ruux kaa awood roon.

Waa maxay u kala gar qaadidda?

Siyaabaha kale ee lagu xallin karo khilaafaadka, ama habka loo yaqaano ADR, waa hab ay dadku ku xallistaan khilaafkooda ayagoon maxkamad tagin. Ma lagugu khasbi karo isticmaalka habka ADR haddii arrintu ay khusayso xeerka qoyska. Adiga iyo saygaadii hore waa in aad go'aanka si xor ah u gaartaan.

U kala gar qaadidda, adiga iyo saygaadii hore waxaad shaqaleysineysiin ruux saddexaad si uu idiinku kala gar naqo. Qofkan saddexaad waxaa lagu magacaabaa **garqaade**. Garqaadaha ma idin kala furi karo mana nasakhi karo guurkiina, laakiin wuxuu go'aamin karaa ruuxa caruurta haynayo, kharashka reerka, xiriirka caruurta iyo sida loo kala qeybsan lahaa hantida reerka. Garqaadaha waxay go'aan ka gaari karaan wixii aad ka codsataan oo keli ah.

Garqaadayaasha waa in ay go'aankooda ku saleeyaan sharciga xeerka qoyska oo Canada ama kan gobolka Ontario u degsan.

Habka u kala gar qaadidda waa sida maxkamadda oo kale, laakiin xoogaa ka duwan. Badanaa dadka waxay la yimaadiin ruux qareen ah. Dacwaddiina marka la dhageysanaayo, adiga iyo saygaadii hore sida aad xaqqa u aragtaan ayaad sheegeysaan, waadna soo bandhigeysaan wixii caddeyn ah ee aad heysaan. Marka aad labadiinaba hadalka dhameysataan, garqaadaha ayaa go'aan gaarayo. Go'aankaas waxaa lagu magacaabaa **abaaal-marin Garqaad**.

Haddii aadan aqoon xaqqa uu sharciga Kanada kuu ogolyahay, weydii ruux qareen ah inta aadan heshiiska waan-waanta ah gelin. Mar haddii la bilaabo gar qaadidda, kama noqon kartid. Waa in aad u hogaansanaato go'aanka garqaadaha xitaa haddii aadan ku qanacsaneyn. Kol haddii abaal-marin Garqaad uu waafaqsan yahay sharciga Kanadiaanka, waa in loogu dhaqmaa si sharci ah.

Habkan u kala gar qaadidda ah waa qaali maxaa yeelay waa in aad qareen shaqaaleysaa. Waxaad kaloo aad bixineysaa lacagta garqaadaha. Xilliga garta la qaadayo haddii aadan la imaan qareen, waa in aad caddeysaa in aad horey ula soo tashatay ruux qareen ah inta aadan u fariisanin garta. Qiimaha kharashka ku baxaayo wuxuu ku xiranyahay inta ay weydiistaan garqaadaha iyo qareenka. Xafiiska "Legal Aid" ka ma bixiyo kharashka ku baxa waan-waanta qoyska.

Sidee ayey u kala duwan yihiin habka u kala gar qaadidda iyo dhex-dhexaadinta?

Dadka waxay badanaa isku khaldaan habka u kala gar qaadidda labada ruux iyo kan dhex-dhexaadinta. Way kala duwan yihiin. **Dhex-dhexaadin** waa nooc ka mid ah noocyada ADR. Habka dhex-dhexaadinta, ruux xirfad u leh sida dadka loo dhex-dhexaadiyo ayaa ka caawiyo labada qof sidii ay heshiis u gaari lahaayeen. Haddii aad isticmaaleysid habka dhex-dhexaadinta, waxaad leedahay awood aad wax ku diido. Waad ka tagi kartaa wada hadalka marka aad doonto, ama waad diidi kartaa intaa uu kuu ogolaaday saygaada, ama uu soo jeediyey ruuxa dhex-dhexaadiyaha ah. Habka u gala gar qaadidda, wax awood ah ma lihid. Waa in aad adeecdaa go'aanka garqaadaha, kol haddii go'aankaasi uu waafaqsan yahay sharciga. Maxkamadda ayaad weydiisan kartaa rafcaan ku aadan go'aanka abaal-marinta garqaadka arrintaada haddii ay duruuf jirto.

Sidee ayuu habka u kala gar qaadidda uga duwan yahay heshiiska goonida loo galo?

Mararka qaar, dumarka waxaa lagu khasbaa in ay aaminaan go'aan uu u gaaro qof xil ka mudan sida takhtarka, ama wadaadka diinta bara. Haddii qofkaasi uusan ahayn ruux garqaade ah, go'aankiisa ma noqonaayo mid sharciyeysan oo la adeeci karo.

Haddii aad ka shakisantahay ruuxa idiin kala gar qaadayo in uusan ahayn ruux garqaade ah, codso in uu ku tuso caddeyn ah in uu yahay ruux garqaadanimada xirfad u leh oo howshan ka bixi kara. Gobolkan Ontario, garqaadayaasha aanan qareeno ahayn, waa in ay tababar u leeyihiin sharciyada xeerka qoyska. Sidaas oo kale garqaadayaasha oo idil waa in ay u tababaranyihiin sida loo garan lahaa calaamadaha lagu garto rabshadaha ka dhaca qoyska dhexdiisa.

Sidee loo fuliyaa go'aanka garsooraha?

Kolka ay dhamaato gar qaadidda, go'aanka waad ka diwaan gelin kartaa xafiiska maxkamadda xeerka qoyska si loo fuliyo. Mar haddii la diwaan geliyo, maxkamadda waxay u fulineysaa go'aankan sidee asaga oo maxkamadda ka soo baxay oo kale haddii shuruudaha la rabo la fuliyo.

Faa'idada iyo khasaaraha uu leeyahay habkan

Dadka qaar waxay leeyihiin u kala gar qaadidda faa'ido ayey leedahay maxaa yeelay

- aad bay waxtar u leedahay, way fududahay waana ka kharash yartahay adeega maxkamadda
- waa mid aad wax ka beddeli karto marka la doono
- adiga iyo saygaadii hore waad wada go'aansan kartaan ruuxa garqaadaha ka noqon lahaa doodiina

Hase ahaatee, dad badan waxay aaminsanyihiin in habkan u kala gar qaadidda ah uusan ku fiicnayn xallinta arrimaha qoyska dhexyaala. garqaadaha awood badan ayuu leeyahay wuxuuna gaari karaa go'aan aan xaq ahayn. Sidoo kale, gar qaadiida uma fiicna dumarka maxaayeelay dumar badan ma awoodaan in ay qareen qabsadaan. Haddii aadan qabin qareen ma garan kartid xuquuqda aad leedahay oo idil, mana garan kartid sida aad u qancin lahayd garqaadaha arrintaada gacanta ku haya.

Sharciga maxuu ka qabaa garqaadiddan ku aadan arrimaha xeerka qoyska

Qodobada ugu muhimsan ee ku aadan xuquuqdaada oo *sharciga u kala gar qaadidda* qeexayo waxaa ka mid ah:

- Garqaadid kasta waa in ay waafaqsantahay sharciga Kanada ama midka Ontario u degsan ama waa sharci darro. Tusaale ahaan, garqaadayaasha ma oran karaan saygaada ha qaato sadka ugu badan ee ku aadan qiimaha guriga iyo hantida taala maxaa yeelay sharciga Kanada u degsan wuxuu leeyahay labada qof kolka ay kala tagaan waa in ay kala bartaan qiimaha hantida guriga.
- Heshiiska gaarka ah oo ay dhex-dhexaadiyen dad aan garqaade ahayn ma ahan mid ay khasab tahy in la adeeco.
- Marka dadka loo kala gar qaadayo, *Sharciga Xeerka Qoyska* ayaa ka muhimsan *Sharciga u kala Gar Qaadidda*. Maxkamadaha waa in ay isticmaalaan qaanuunka u degsan xeerka qoyska.
- Go'aanada ka soo baxa habka u kala gar qaadidda waxay ka mid yihiin "heshiisyada qoyska". Maxkamadaha waa in ay go'aamadan u tixgeliyaan sida kuwa heshiisyada qoyska ka soo baxa.

- Go'aan kasta oo ku aadan caruurta arrimahooda waa in uu ku saleysan yahay mabda'a "**meesha ay danta caruurta ku jirto**". Garqaadayaasha waa in ay tixgelin siiyaan qaanuunka muhimka u ah xeerka qoyska oo ay ku jirto danta caruurta marka ay wax go'aaminayaan. Qaanuunkan wuxuu ku qeexanyahay qeybta 24^{aad} ee "*Children's Law Reform Act*".
- Waxaad mar kasta xaq u leedahay in aad maxkamadda ka **codsato rafcaan** in aad ka qaadato go'aanka garsooraha. Xaqaada ha ka tagin. Haddii aad dood ka qabto go'aanka garqaadaha, maxkamadda way beddeli kartaa go'aanka garsooraha. Maxkamadda waxay saa u sameyn kartaa haddii uu garsooraha ku dhaqmo wax aan sharciga xeerka qoyska ku jirin ama uu la yimaado go'aan ay maxkamadda qalad u aragto. Maxkamadaha waxay kaloo fiiriyaan in garsooraha uu arrinta ku saabsan mas'uuliyadda iyo ka warqabidda caruurta uu ku saleeyey qaanuunka "*Children's Law Reform Act*". Maxkamadda waxay fulineysaa go'aanada ku saleysan meesha ay danta caruurta ku jirto oo keli ah.

- Go'aanada ka soo baxa habkan gar qaadidda ah waa in ay qoraal ahaadaan.
- Laga bilaabo Abriil 2008, garqaadayaasha maxkamadaha xeerka qoyska oo aanan ahayn qareeno waa in ay qaataan tababar ku saabsan sharciyada xeerka qoyska ee Kanada. Garqaadayaasha oo idil waa in ay qaataan tababar ku saabsan rabshadaha ka dhaca qoyska dhexdiisa.
- Garqaadayaasha waa in ay hubiyaan in nidaamka ay raacayaan uu noqdo mid cadaalad ku saleysan. Si ay taasi u dhacdo waa in ay soo baaraan in horey rabshado ay guriga uga dhaceen iyo in horey laguugu xadgudbay. Waa in ay xitaa baaraan in awood isku mid ah aad lahaydeen adiga iyo saygaadii hore kolka aad wada nooleydeyn. In kasto oo garqaadayaasha ay leeyihiin awood ay kugu amaan geliyaan kolka ay howsha ku jiraan, haddana dadka badankood waxay aaminsanyihiin in habkan uusan si fiican u shaqeyneynin haddii uu saygaada ahaa ruux rabsho badan ama dadka ku xadgudba, haddii uu isku dayey in uu kugu amar taagleeyo ama uu ku cabsiiyo, ama uu kaa faa'ideystay.

- Inta aadan bilaabin shirka u kala gar qaadidda, waa in aad saxiixdaa foomka caddeynayo in aad **la soo tashatay qareen kuu gaar ah**. Sidoo kale qareenka kula taliyey waa in uu saxiixaa foomkan asaguna.
- Garqaadayaasha waa in ay sanadkiiba laba jeer u soo warbixiyaan Wasaaradda Garsoorka Guud. Waa in ay ka soo warbixiyaan inta qof oo ay u garqaareen sanadkaa gudahiisa. Garqaadayaasha waa in ay diiwaanka howlaha ay qabteen ururiyaan ugu yaraan muddo 10 sano ah.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
- 7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)**
8. Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaataada xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*



flew Family Law
Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et
droit de la famille
Le droit de savoir

Funded by / Financé par :
 Ontario

Xogwarranka ku qoran qoraaladan waa aragtida hay'adda FLEW
sidaa darteed dowladda Gobolka mas'uul kama ahan nuxurka qoraaladan.